# MASHRUUCA QAYBINTA XALINTA

## Wuxuu ka kooban yahay


**1 Qeexitaanada iyo tarjumida 1**

1.1 Qeexitaanada 1

**2 Qaybinta Lacagta Xalinta 4**

2.1 Maamulka Dejinta Mashruuca Qaybinta 4
2.2 Bilaabida Mashruuca Qaybinta Xalinta 5
2.3 Waajibaadka, Masuuliyaadka iyo Doorka Maamulaha 5
2.4 Sixitaanka 5
2.5 Kharajka Maamulayaasha 5

**3 Hubinta iyo Kooxda Xubnaha Diiwaanka 5**

3.1 Hubinta 5
3.2 Diiwangelinta iyo Xubnaha Kooxda 6
3.3 Caruurta iyo iinta Shakhsiyaadka 7

**4 Waajibaadka Xubnaha Kooxda 8**

**5 Ogyesiiska ugu horreya ilaa Xubnaha Kooxda 8**

**6 Dib-u-eegida 9**

6.1 Xuquuqda si loo raadiyo dib u eegida 9
6.2 Habka raadinta dib u eegida 9
6.3 Ku guuldaraysiga raadinta dib u eegida 9
6.4 Habka dib u eegida 9
6.5 Go'aanka dib u eegidu madaxabanaani waa kii ugu dambeeyey 10

**7 Sheegashada Baarka 10**

**8 Xisaabinta koox walba oo mudan lacag bixinta kasta 11**

**9 Ogeysiinta Qiimaynta 11**

**10 Lacag bixinta cadadka xalinta 11**

10.1 Dib ugu celinta dacwoodaha 11
10.2 Lacag Bixinta Xubnaha Kooxda 11

**11 Ogeysiiska Xalinta Lacagta** **11**

**12 Ogeysiisyada** **12**

**13 Mudaynta** **12**

**14 Gunaanadka Maamulka** **12**

14.1 Qaybinta Warbixinta 12
14.2 Dhamaadka Maamulka 13

**15 Tarjumida** **13**

# Asalka

A Dacwoodaha iyo isdifaacaha ayaa fuliyey Hawsha Xalinta.

B Mashruuca Qaybinta Dejintu wuxuu asaasaa habka loo qoondaynayo loona qaybinayo xisaabta dejinta la bixiyey iyada oo waafaqsan Dejinta ayna maxkamadu u Xakuntay.

C Mashruuca Qaybinta Xalinta ma uu noqon mid shaqaynaya ilaa Maxkamadu ka samaysay Amarada Ansixinta.

D Degitaankaan Mashruuca Qaybintu wuxuu bixiyaa, waxyaalla kale ka sokow, si talaabooyinka ku xigaa u dhacaan:

Xoghayaha Wasaarada Caafimaadka, barasoofar Euan Wallace AM waxaa loo magacaabay Maamulaha Mashruuca Qaybinta Xalinta.

Maamuluhu wuxuu abuuraa Xubnaha Kooxda Diiwaanka, isagoo taxaya Xubnaha Kooxda Mudan.

Maamuluhu wuxuu siiyaa Ogeysiin Hore Xubnaha Kooxda, isaga oo codsanaya inay iska diiwaangeliyaan si looga qaybgalo qaybinta xisaabta Dejinta.

Maamuluhu wuxuu ka bixiyaa Qadar Magdhow ah lacagta Dejinta la siinayo kuwa dacwoonaya.

Maamuluhu wuxuu xisaabiyaa lacagta Xalinta qof kasta oo mudan oo Xubin ka ah Kooxda.

Maamuluhu wuxuu u diraa Ogeysiinta Qiimaynta qof walba oo Kooxda ka tirsan iyada oo ku xiran qaansheegadkiisa.

Maamuluhu wuxuu u qaybiyaa Lacagta xalinta qof walba oo xaq u leh oo ka socda Xubnaha Kooxda Mudan Lacagta Xalinta ka dib isaga oo ka dhigaya kala goynta Cadadka lacagcelinta.

---

# Qaybta shaqaynaysa

## 1 Qeexitaanka iyo Tarjumaada

### 1.1 Qeexitaanada

Qeexitaanada soo socda waa shaqaynayaan haddaan arrintu wax u baahnayn:

| | |
|---|---|
| **Xeerka** | Taas macneheedu *waa Xeerka Maxkamada Sarre ee 1986* (Vic). |
| **Maamule** | Macnaheedu waa Xoghayaha Wasaarada Caafimaadka, Professor Euan Wallace AM. |
| **Qaangaar** | Taas macneheedu waxa weeye wax ka weyn da'da 16aad sida 4ta Juulay 2020. |
| **ASOC** | Taas macneheedu waxa weeye Caddaynta Wax laga bedelay oo taariikhdeedu tahay 24ka Sebeteembar 2021. |

| | |
|---|---|
| **Amarada Ansixinta Taariikhda** | Oo macneheedu yahay taariikhda ka dib taas oo:<br>(a) mudada rafcaanka ee khusaysa Ansixinta Amarada ay samaysay Maxkamadu ayaa dhacay iyada oo aan rafcaan la qaadan ama dalabka tegida aan la xerayn; iyo<br>(b) haddii maxkamadu samayso Amarada Ansixinta iyo rafcaan ama dalabka u gudbida rafcaanka laga qaadanayo Amarada Rafcaanka la bilaabay, ka dib saddex Maalmood oo Shaqo ka damaysa dib taariikhda la samaynayo go'aanka ugu dambeeya ee arrimaha mawduuca rafcaanka (oo uu ku jiro rafcaan kasta oo xiga ama dalabka rafcaanka) la sameeyey. |
| **Amarada Ansixinta** | Macnaheedu waxa weeye amarada Maxkamada ee hoos yimaada s33V ee xeerka ansixinaya xalinta Dacwda, iyo shuruudaha lagu Xusay Dacwada, iyo ansixinta Natiijada Qaybinta Mashruuca (ama Xalintaan Mashruuca Qaybinta lagu xoojiyey wax ka bedel kasta oo ay maxkamadu samaysay). |
| **Maalinta Shaqada** | Macnaheedu waa bangiyadee u furan yihiin Hawsha Degmada Melbourne oo aanay ku jirin maalmaha Sabtida, Axada ama maalmaha fasaxa. |
| **Ilmaha** | Oo macneheedu tahay Ilmo ka yar da'da 16 sanadood 4ta Juulay 2020. |
| **Ashtakooyinka** | Macnaheedu waa mudaciyiinta iyo Xubnaha Kooxda ASOC-kooda, jawaab ku taariikhaysan 27dii Janaayo 2022 iyo dhamaan qaansheegadka xiriirka la leh ama ka soo bixida ama wixii la xiriira mawduuca Socodsiinta dacwada ama xaallada isku mid ka ah. |
| **Maxkamad** | Macnaheedu waa Maxkamada Sarre ee Victoria. |
| **Isdifaacaha** | Macneheedu waa Dawlad Goboleedka Fiktooriya. |
| **Kooxda xaqa u leh Xubin** | Macneheedu waa Xubin Kooxda ka mid ah kaas oo xaq u leh inuu hello qaybinta lacagta Xalinta sida uu xisaabiyey Maamuluhu iyada oo waafaqsan Xalintaan Habka Qaybinta. |
| **Estate Towers** | Macnaheedu waa cinwaanada soo socda:<br>• 12 Holland Court, Flemington 3031;<br>• 120 Racecourse Road, Flemington 3031;<br>• 126 Racecourse Road, Flemington 3031;<br>• 130 Racecourse Road, Flemington 3031;<br>• 9 Pampas Street, North Melbourne 3051;<br>• 12 Sutton Street, North Melbourne 3051;<br>• 33 Alfred Street, North Melbourne 3051; |

| | |
|---|---|
| | • 76 Canning Street, North Melbourne 3051; iyo<br>• 159 Melrose Street, North Melbourne 3051. |
| **Mudada ugu horraysay** | Macnaheedu tahay qiyaas ahaan 4.00galabnimo ama 4.30 galabtii 4tii Juulay 2020 ilaa 5.00 casarkii 9kii Juualy 2020 (markay tahay 9 Pampas Street, North Melbourne iyo 159 Melrose Street, North Melbourne) iyo qiyaastii 4.00 fiidkii ama 4:30 casarkii 4tii Juulay 2020 (ama waxyar ka dib) ilaa 11:59 daqiiqo 9ka Juulay 2020 xaalka dhamaan guryaha dhaadheer oo kale |
| **Xubin Kooxeed** | Taas macneheedu waa ku jiritaanka qeexida xubinta kooxda ee ASOC, kaas oo aan la qaadan- iskaga baxay dacwada mana go'aasan inuu soo noqdo Sii-wadida, sida waafaqsan qaybta 33J ee xeerka, oo ay ku jiraan kuwa dacwoonayaa. |
| **Lacagsiinta Xubinta Kooxda** | Taas macneheedu waxa weeye qadarka uu xisaabiyey maamuluhu sida waafaqsan 8 iyo loo qaybiyo Xubnaha Kooxaha Mudan. |
| **Ogeysiiskii Hore** | Macneheedu waa ogeysiiskii lagu sharxay lifaaqa 5naad. |
| **Qof da'yar** | Taas macneheedu waxa weeye xubin ka mid ah kooxda oo yar marka laga hadlayo shuruucda 15ka |
| **Ogeysiinta Qiimaynta** | Macneheedu waa ogeysiin lagu sharxay qodobka 11. |
| **Ogeysiinta lacagbixinta Xalinta** | Macnaheedu waa ogeysiin sida loogu qeexay lifaaqa.11aad. |
| **Qof iin leh** | Macneheedu waa "qof iin leh" oo hoos imanaya qodobka 33A ee xeerka iyo amarka 15aad ee shuruucda. |
| **Dacwoodaha Kharajkiisa Sharciga** | Macnaheedu waa dacwoodaha kharajkiisa sharciga ee maangalka ah iyo kharajkii lagu bixiyey magacooda iyo/ama magaca Kooxda oo ay ku jiraan kharajka Dacwoodaha oo lagu galay dalabka Ansixinta Dejinta sida ay ansixisay Maxkamadu |
| **Sii wadida** | Macnaheedu waa Hassan oo ka soo horjeeda Dawlada Fiktooriya SECI 2021 00826. |
| **Qadarka Magdhow ama Cawil celinta ah** | Macnaheedu waa qadar kasta oo dacwooduhu doonayo waxaa laga yaabaa in la siiyo ayna ansixiso Maxkamadu iyaga oo aqoonsanaya booskooda oo ay tahay in la siiyo dacwoodaha lacagtii xalinta wadarta dejinta. |

| | |
|---|---|
| **Diiwaangelinta Xubnaha Kooxda** | Macnaheedu waa qadar kasta oo dacwooduhu doonayo waxaa laga yaabaa in la siiyo ayna ansixiso Maxkamadu iyaga oo aqoonsanaya booskooda oo ay tahay in la siiyo dacwoodaha lacagtii xalinta wadarta dejinta. |
| **Taariikhda diiwaangelinta** | 27da Juun 2023 oo xubnaha kooxda looga baahan yahay inay diiwaangeliyaan waxay rabaan si ay uga qaybgalaan qaybinta xalinta. |
| **Mudada ay khusayso** | Macneheedu mudada 1aad iyo 2aad. |
| **Xeerarka** | Macnaheedu waa *Maxkamada Sarre ( Habka Madaniga ah ee Guud) Xeerarka 2015* (Vic) |
| **Ujeedada Qorshaha** | Macnaheedu waa hadafka maamulida Xalinta Mashruuca Qaybinta iyada oo la qadarinayo sida ugu fiican oo xubnaha Kooxda guud ahaan, khaasatan, iyada la samaynayo dheelitir u dhexeeya:<br>a) bixinta waqti maalgal ah iyo fursada in dadka ugu badan Xubnaha Kooxda Xaqa-u-leh ay u hellaan sidii suurtagal ah Xalinta lacagbixinta oo hoos imanaysa Mashruuca Qaybinta Xalinta;<br>b) Iyada oo la xaqiijinayo Kharashaadka Maamulka ee lagu galay hirgelinta Mashruuca Qaybinta Xalinta ayaa maangal ah dariiqooyinka loo isticmaalay hirgelinta Mashruuca Xalinta Qaybinta waa wax shaqayn kara, dheelitiran qiima ahaana la awoodo iyada oo la ixtiraamayo danaha Xubnaha Kooxda gebi ahaan; iyo bixinta lacagta Xalinta Mashruuca Qaybintu waa wax shaqayn kara, isu-dheelitiran kharaj ahaana meel mar ah iyada oo la tixgelinayo danaha xubnaha kooxda guud ahaan; iyo siinta<br>c) lacagta lagu bixinayo Xalinta lacagsiinta xubnaha kooxda xaqa u leh waqti maangal ah. |
| **Mahruuca Qaybinta Xalinta** | Taas macneheedu waxa weeye mashruuca Qaybinta Xalinta sida ay ansixisay Maxkamadu, kuwaas oo ay ku jiraan qorshayaal iyo lifaaqyo. |
| **Mudada Labaad** | Macnaha laga bilaabo 11:59 habeenimo 9ka Juulay ilaa 11:59 duhurkii 18ka Juulay 2020. |
| **Xal samaynta** | Taas macnheedu waa Xal Samaynta ay fuliyeen kooxuhu kuna taariikhaysan 3da Maarso 2023. |

| | |
|---|---|
| **Lacagta Xalinta** | Taas macneheedu waxa weeye $5,000,000.00, oo ay ku jiraan wax kasta oo dulsaar oo aanay ku jirin kharajka sharciga iyo wixii la bixiyey. |
| **Unug** | Qaybta lacagta xal-gaarida Xubnaha Kooxda xaqa u leh inay hellaan sida waafaqsan qodobka 8. |

# 2 Qaybinta lacagta xal-gaarida.

## 2.1 Maamulka Mashruuca Qaybinta xalgaarida

Xoghayaha Wasaarada Caafimaadka, Professor Euan Wallace. AM Waa maamulaha iyo qaybiyaha lacagta xaqa ah.

## 2.2 Bilaabida Xalinta Qaybinta Mashruuca

Mashruuca Qaybinta Xaqu wuxuu bilaabanayaa taariikhda marka Maxkamadu samayso Amarka Ansixinta.

## 2.3 Waajibaadka, Masuuliyad iyo Doorka maamulaha

(a) Iyada oo aan la xanibin waajibaadka, masuuliyaadka iyo doorarka Maamulaha oo si kale loogu cayimo Mashruuca Qaybinta Dejinta, Maamulaha:

(i) waxaa waajin ku ah in uu maamulo oo qaybiyo Xalinta si waafaqsan Mashruuca Qaybinta Dejinta iyo ujeedooyinka Mashruuca;

(ii) waxaa waajiba in uu wax u qabto sida ugu dhaqsaha badan sida waafaqsan Mashruuca Qaybinta Hadafka iyo amara kasta oo Maxkamada;

(iii) waxaa waajiba in uu waajibaadkeeda si taxadar leh, akhlaaqda waafaqsan, daryeelka laga filayo iyo xirfada, iyo si cadaalad ah oo sida ugu fiican Xubnaha Kooxda guud ahaan mana aha sida wakiilka xubin kasta oo kooxeed;

(iv) ayaa hawlgelin karta qolla saddexaad oo ay ku jiraan, garyaqaano, la taliyayaasha cashuurta, bixiyayaasha adeega diiwaangelinta iyo guryaha wax loo kala dirayo;

## 2.4 Sixitaanada

Maamuluhu waxaa laga yaaba in uu waqti kasta ku saxo siday u rabaan sixitaanka wixii qalad ah, ama ka tirtirid ku dhacaysa hawsha maamulka mashruuca Qaybinta iyo xal ka gaarida.

## 2.5 Kharajyada Maamulaha

Kharajka Maamulaha maaha in laga gooyoo lacagta xalinta waxaana bixinaya isdifaacaha.

# 3 Caddaynta iyo diiwaangelinta Xubnaha Kooxda

## 3.1 Xaqiijin

(a) Maamulaha waxaa waajib ku ah inuu qaado dhamaan talaabooyinka dhici kara si loo caddeeyo aqoonsiga iyo xaq u yeelashada iyo da'da dhamaan Xubin Kooxeed walba si looga qaybgalo qaybinta xisaab samaynta, iyada;

(i) oo la ta'kiidinayo aqoonsiga Xubin Kooxeed walba oo isdiiwaangeliyey si uu uga qaybgalo qaybinta lacagta la bixinayo (sida magac, sinji, taariikhda dhalashada iyo ciwnaanka) taas oo ka

tarjumaysa macluumaadka la helli karo oo haddii kale uu heli karo Maamuluhu;

(ii) lagula xiriirayo Xubnaha Kooxaha telefoon, email, warbaahinta bulshada ama haddii kale in la caddeeyo aqoonsigooda;

(iii) loogana baahan yahay Xubnaha Kooxdu inay caddeeyaan aqoonsigooda lagana yaabo iyo inay deganaayeen ama joogeen Estate Towers intii lagu jiray mudooyinka laga hadlayo (ama, xaalka shakhsi iin qaba, oo weydiinaya masuulkooda sharciyeed ama wakiilada shakhsiyeed inay bixiyaan caddayntaas) iyo/ama macluumaad kale oo kasta ama dokummentiyo si loo caddeeyo aqoonsigooda iyo xaq u yeelashadooda inay ka qaybgalaan qaybinta lacagta dejinta;

(iv) iyo la sameeyo su'aal kasta oo maangal ah si loo caddeeyo aqoonsiga iyo xaq u yeelashada inay ka qaybgalaan qaybinta wixii lagu bixinayo xubnaha kooxda ama shakhsiyaadka kale si ay u yimaadaan waraysiga iyada oo ujeedadu tahay helitaanka macluumaadka khuseeya.

(b) Maamuluhu waxaa laga yaabaa waxa uu awood u leeyahay go'aansiga talaabooyinka la ku haboon caddaynta aqoonsiga iyo xaq u yeelashada Xubin Kooxeed.

(c) Haddii maamuluhu qadariyo in aqoonsiga Xubnaha Kooxda ama mudnaanta inay ka qaybgalaan qaybinta lacagtii Xalinta aan la cadayn ka karin, Maamuluhu waxaa laga yaabaa inuu go'aan ka gaaro diiwaangelinta Xubinta Kooxda si xubintaasi uga qaygasho qaybinta lacagta Xalintu aanay jirin saamayna lahayn.

## 3.2 Diiwaangelinta Xubnaha Kooxda

(a) Sida ugu dhow oo ay ku shaqayn karto ka dib marka Maxkamadu samayso Amaro Ansixin ah, Maamulaha waxaa waajib ku ah inuu diyaariyo Diiwaagelinta Xubnaha Kooxda.

(b) Maamulaha waxaa waajib ku ah:

(i) Haynta Diiwaangelinta Xubnaha Kooxda;

(ii) Ogeysiinta si loogu diro Xubnaha Kooxda;

(iii) qiimay ashtakada ama waxay sheeganayaan Xubnaha Kooxdu si looga qaybgalo qaybinta lacagta Xalinta wixii dhacay;

(iv) in la meelmariyo Lacagbixinta Xubinta Kooxda si loo siiyo Xubnaha Kooxda ee xaqa u leh; iyo

(v) caqabadaha qaybinta isku-darka, sii maxkamada warbixin hoosta ka xariiqaysa Lacag Bixinta Xubnaha Kooxdu sameeyeen oo cadaynaysa dhamaan xisaabta lagu bixin doono xalinta.

(c) Qaybaha, ilaa heerka ay ka hayaan macluumaadka soo socda, waana inay ahaataa 5 Berri oo Shaqaynayo oo Maxkamadu ka dhigayso Amarada Ansixinta, waxay siinaysaa Maamulaha:

(i) Koobiyada loo bixiyey ogeysiis ahaan taas oo la soo gudbiyey in hawshu socoto; iyo

(ii) Cinwaanadii ugu dambeeyey oo ay deganaayeen Xubnaha Kooxda ugu cadcad.

(d) Maamuluhu waa in aanu ku darin shakhsiyaadkaas kuwaas oo, waqtigii Ansixinta Amarada, lagu soo qadimay doortay inay iska baxaan aana dib ugu soo noqon dacwada waqtigii Diiwaanka Xubnaha Kooxda.

(e) Diiwaangelinta Xubnaha Diiwaanka waa inay leeyihiin macluumaad wixii khuseeya Koox walba oo xaq u leh oo ay ku jiraan

   (i) Magaca

   (ii) Faahfaahinta, ayna ku jiraan

      (A) Cinwaanka hadda ah:

      (B) Nambarka telefoonka; iyo

      (C) Cinwaanka Email-ka

   (iii) Taariikhda Dhalashada;

   (iv) Cinwaanka Estate Towers-ka oo xubinta kooxdu deganaa, ama booqanayey, intii lagu jiray waqtigaas;

   (v) Ama Xubinta Kooxdu ha ahaado degane ama booqdaha Estate Towers intii lagu mudada xusan;

   (vi) Caddaynta la bixiyey si loo aqoonsado laguna quweeyo dacwada Xubnaha kooxda si ay uga qaybgalaan qaybinta lacagta xalinta, taas oo laga yaabo inuu ku jiro koobi, laakiin aanu ku ekayn:

      (A) Ijaarashada degaanka oo daboolayo mudada xusan;

      (B) qaansheegadyada telefoonka, korontada, internet, gaaska ama caddaynta bangiga mudada xusan;

      (C) Xiriirka Medicare-ka ama dukumintiyada ku taariikhaysan mudada xusan;

      (D) Wada xiriirka Centrelink iyo ogeysiisyada

      (E) laysanka dareewalka ama koobiyada laysanka dareewalka ogolaansha bartaha;

      (F) Diiwaanada loo isticmaalay xaq u yeelashada Xubinta Kooxda iyo cadaynta aqoonsigooda, da'da iyo cinwaanka ku yaalla Estate Towers; iyo ama

      (G) Caddaynta Dhaarta oo qof ahaa Degane caddaynayo inuu ahaa degane, ama booqde, Estate Towers dhaman ama intii lagu jiray mudada xusan.

## 3.3 Kuwa aan qaangaarin iyo kuwa leh iinta

(a) Halka Maamuluhu macquuliyan aaminsan yahay Xubin Kooxda ka mid ah ama laga yaabaa inuu yahay qof iin qaba (eray uu ku jiro ilma-yar):

   (i) Maamuluhu waxaa laga yaabaa inuu bixiyo ogeysiin qoran Xubin Kooxda ka mid ah taas oo takiidinaysa aaminsanaanta;

   (ii) Xubinta kooxdu inuu xuso si loo magacaabo qof oo iyaga shakhsiyan matalaya, iyo, iyada oo ku xiran lifaaqa 3.3(b), Maamulaha waxaa waajib ku ah inuu magacaabo qofkaas kaas oo kooxda matalaya wixii la xiriira hawlaha Mashruuca Qaybinta xaqsoorka iyo

   (iii) Maqnaanshaha magacaabis kasta sida waafaqsan lifaaqa3.1(a)(ii), Maamulaha waxaa waajib ku ah inuu magacaabo wakiilka shakhsiyeed ee Kooxdaas wixii la xiriira hawlaha Mashruuca Qaybinta Xalinta.

(b) Halka danaha qof Xubin ka ah Kooxda Iinta Shakhsiyeed, Maamulaha, ayaa laga yaabaa:

(i) Magacow ama ka saar wakiilka shakhsiyeed oo Xubinta Kooxda; ama

(ii) Ku bedel qof kale wakiilka shakhsi wakiil ka ah ahaan Xubinta Kooxda.

(c) Codsiga Xubin Koox ahaaneed, Maamulaha ayaa laga yaabaa inuu magacaabo wakiil shakhsiyeed oo Xubin kooxeed in kasta oo Xubinta Koox ahaaneed aanay ahayn, Maamuluhuna ma fahmi karo macquuliyan iyagu inay ahaadaan, qof iinta ku xiran. Maamulaha waxaa waajib ku ah inuu ugu sheego shakhsiga qoraal ahaan magacaabistooda wakiilka shakhsiyeed oo Xubnaha Kooxda hoos imanaya lifaaqa.

(d) Halka wakiilka shakhsiyeed lagu magacaabay si waafaqsan lifaaqan3.3 (a), 3.3(b) iyo 3.3(c), hawsha Mashruuca Qaybinta Xaqa ayaa dib u habayn loogu samaynayaa sida soo socota:

(i) Marka laga saaro wixii lagu bixiyey Mashruuca Qaybinta Dib-u-dejinta ama Maamulaha, wax kasta oo uu u baahan yahay Mashruuca Qaybinta Degaanka ama Maamuluhu u baahan yahay in uu sameeyo Xubin Kooxeed (oo ay ku jirto dalbashada dib u eegid), oo uu samayn doono wakiilka shakhsiyeed; iyo ogeysiin, wada-xiriir ama macluumaad la bixiyey taariikhda ballanta ka dib waxaa ah in siiyo wakiilka shakhsiyeed oo xubinta kooxeed.

(ii) ogeysiin kasta, wada-xiriir ama macluumaad la bixiyey ka dib waxaa waajiba in maalinta ballanta la siiyo wakiilka shakhsiyeed ee xubinta kooxdaas.

(e) Halka wakiilka shakhsiyeed loo magacaabay si waafaqsan clause-ka3.3(a) iyo 3.3(b), waxqabadka waa in dib loo qaabeeyaa sidaas, iyada oo ku xiran amar kasta oo intaas ka badan oo Maxkamada, lacag bixin kasta oo la siiyey Xubinta Kooxda waxaa la siin doonaa qofka wakiilka ka ah magaca xubinta Kooxda.

(f) Waalid ama masuul qof oo hoos imanaya Iinta oo qof yar ah, ama wakiilka shakhsiyeed qof hoos imanaya Iinta ayaa laga yaabaa inuu dhamaystiro soona celiyo Ogeysiinta Sheegashada iyo dukuminti kale oo loogu baahan yahay ujeedada mashruuca dejintaan mashruuca qaybinta oo magaca qofka kuwa hoos imanaya Iinta kuwaas oo ah waalid, masuul ama wakiil shakhsiyeed.

# 4 Waajibaadka Xubnaha Kooxda

(a) Waxba Mashruucaan Xalinta ka hor-istaagi mayaan Xubin kooxeedna inay haystaan wakiil sharci, ay kharajkooda la baxayaan, waxaase shardi ah wax kharaj ah sharciga ah ama wixii la mid ah sharciga ay weydiisan karaan Maamulaha ama wadarta dejinta.

(b) Koox walba waxaa waajib ku ah inay samayso wax kasta oo lagu xusay Mashruuca Qaybinta Xalinta ama sida macquul ahaan loo codsaday ama uu jaheeyey Maamuluhu, oo ka mid yihiin:

(i) siinta Jihayn, macluumaad ama dukumintiyo, ay ku jirto faahfaahinta bangiga;

(ii) siinta awooda ama ogolaanshaha si maangal uu qadariyey maamulaha si loo siiyo saamayn mashruuca Qaybinta Xalinta; iyo

(iii) Raacista xad kasta oo uu ay dhigeen Maamulaha ama Maxkamadu.

(c) Haddii xubin ka mid ah kooxdu aanay samayn waxyaalla laga filayey Mashruuca Qaybinta Xalinta ama si macquulla ay codsadeen ama u hageen Maamulaha ama Maxkamadu, kuwaas oo ay ku jiraan raacista xadayn kasta oo ay Maxkamada ama Maamuluhu u arkeen Xubin Kooxda ka mid ahi waxaan dhicikarin in laga qaybqaato xagga qaybinta lacagta dejinta.

(d) Xubin kasta oo ka mid ah Kooxda waxaa waajib ku ah u sheegida Maamulaha isbedel kasta oo faahfaahintooda meesha lagala xiriirayo ama akoontiga bangiga isbedel kasta oo jira.

# 5 Ogeysiintii ugu horraysay oo ku socota Xubnaha Kooxda

(a) Sida ugu macquulsan oo ugu horraysa, Maamulaha waxaa waajib ku inuu soo Ogeysiinta ugu Horraysa ee ku socota Xubnaha Kooxfa Ogeysiintaas ugu horraysa ku daraya, ugu yaraan Sida soo socota:

(i) Go'aanka Maamulaha haddii shakhsiga soo gudbiyey Ogeysiiska waxaa loo arkay Xubnaha Kooxda Xaqa u leh; iyo;

(ii) Haddii loo arko Xubinta Kooxda Xaqa u leh:

(A) Ama ha loo arko kuwa lo aqablay oo Qaangaar ama Ilmaha ujeedooyinka sadarka 8;

(B) Halka aan horayba la siin ogeysiinta Dacwada, codsi ay ku bixinayaan faahfaahinta akoontiga bangiga ujeedooyinka looga dhigayo Kooxda Xubnaha Lacagbixinta; iyo

(iii) Haddii macluumaad intaas ka badan loo baahan yahay, codsi lagu bixinayo cadaynta, caddayn ama macluumaad maamuluhu u arko lagama maarmaan inuu caawimo caddaynta aqoonsiga xubnaha Kooxda, da'da iyo xaq u yeelashada inay ka qaybgalaan qaybinta lacagta xalkeenida;

(iv) Sharaxaad khusaysa Xuquuqda Xubnaha Kooxda inay arkaan Maamulaha go'aankiisa ogeysiiska ugu horreeya oo la jaanqaadaya qodobka 6;

(v) macnaheedu waa fursada Xubinta Kooxdu ku raadinayo xaqiisa/xaqeeda dib-u-eegida; iyo in

(vi) dib loo eego go'aanka Maamulaha ee la sameeyey, ka raalinoqoshada codsiga Xubnaha Kooxda kuwaas oo qalabku uu tiirsanaa Maamulaha go'aankiisa lagu siiyey Dib -u-eege Madaxbanaan.

# 6 Dib-u-eegid

## 6.1 Xuquuqda lagu raadiyo dib u eegid

(a) Iyada oo ku xiran qodobka 6.2 Xubin Kooxeed ayaa ka raadin karta dib u eegida go'aanka Maamulaha haddii Xubinta Kooxdaasi yahay

(i) Xubin Kooxeed oo xaq u leh inuu ka qaybgalo qaybinta isku darka xalinta (settlement); ama

(ii) Iyada oo loo arkay qaangaar ama ilmoh iyada la socota qodobka 8(ii).

(**Dib-u-eegid**).

(b) Xubin kooxeed xaq uma laha inuu raadiyo dib u eegid go'aan kaleeto oo uu sameeyey Maamuluhu iyada oo waafaqsan Mashruuca Qaybinta

Degitaanka.

### 6.2 Habka raadinta dib u eegida

Haddii Xubin Kooxeed doonayso in la raadiyo Dib-u-eegid iyaga waxaa waajiba ku ah:

(a) inay bixiyaan ogeysiin qoran oo ku socota Maamulaha in aan ka yarayn 10 maalmood oo shaqo ka dib taariikhda ogeysiinta hore oo loo diray Xubin kooxda ka mid ah;

(b) Xus sababaha ay ku dhacday waxa keenay Xubin kooxda ka mid ahi diido go'aanka Maamulaha qofkaasina bixiyo dukuminti caawimaya; iyo

(c) ka raali noqoshada Maamulaha iyada oo la bixinayo dib u eegid madaxbanan oo uu weheliyo qalab laga dhigay qodob 6.4(c).

### 6.3 Ku guuldaraysiga dib u eegida

Haddii xubin ka mid ah kooxdu aanu bixin ogeysiin qoraal ah Maamulaha isaga oo raadinaya Dib-u-eegida xubintooda Kooxda 10 berri gudahood oo la shaqaynayo oo Maamuluhu u dirayo Ogeysiin bilaw ah Xubinta Kooxda, ka go'naanta Maamulaha ee Qiimaynta Ogeysiintu waa ugu dambayn lamana raadin karo dib-u-eegid dambe.

### 6.4 Habka dib u eegida

Maamuluhu wuu qiimayn doonaa wuxuuna go'aan ka gaari doonaa Dib-u-eegida sida waafaqsan hanaanka soo socda:

(a) Markii ugu horaysayba Maamuluhu wuxuu ka qadarin doonaa in dib u eegid la soo gudbiyey waafaqsan clauses 6.2 mid kasta ayaa laga yaabaa inuu bedeli karo go'aankooda Ogeysiinta ugu horraysa.

(b) Haddii Maamuluhu aanu wax ka bedelin go'aankooda Ogeysiinta ugu horraysa, Maamuluha waa waajib inuu u xawilo dib u eegid kasta garyaqaan cusub oo ugu yaraan saddex sanadood Fiktooriya gudaheeda ka shaqaynayey, oo aan lug ku lahayn go'aankii hore ee Maamulaha Kooxdaas ee xaqa u leh inuu ka qaybqaato qaybinta hawlaha dejinta (**Dib u eegaha madaxa banaan**). Ballanta dib u eegaha madaxa banaan waa inay ahaataa heshiis u dhaxeeya qaybaha ku guuldaraysiga heshiiska, Maamuluhuna wuxuu siin doonaa dad difaaca oo ku kooban saddex garyaqaan oo ugu yaraan leh khibrad saddex sanadood ah oo ay ka haystaan Victorian Bar. Kuwa isdifaacayaa waxay dooran doonaan mid ka dadkaas la xulay ka mid si loogu magacaabo dib-u-eegayaal madax banaan.

(c) Maamulaha waxaa waajiba inuu siiyo qalabka soo socda dib u eegaha madaxa banaan 5 maalmood oo shaqo lagu jiro iyada oo lagu xawilayo arrinta Dib u eegi Madaxbanaan:

  (i) Ogeysiinta Dacwada Xubnaha Kooxda;

  (ii) Ogeysiinta ugu horraysa ee Xubnaha kooxda;

  (iii) Codsiga Xubnaha Kooxda ee dib u eegida iyo sabab kasta iyo kaalmaynta dukumintiyada ay bixiyeen Xubnaha kooxdu; iyo

  (iv) Dukumintiyada ay siiyeen Xubnaha Kooxda Maamulku;

  (v) Dukumintiyada ay hayaan iyo/ama inuu ku tashado Maamuluhu si go'aan looga gaaro haddii xubnaha kooxdu uu mudan yahay in laga qaybqaato qaybinta xisaabta Dejinta ama da'da Xubnaha Kooxda.

(d) 10 maalmood gudahood oo lagaga hellayo qalabka Maamulaha, Dib u eegaha madaxa banaani waa inuu go'aansadaa in la cadeeyo ama wax laga bedelo go'aanka Maamulaha iyada oo dib loo eegayo (**go'aanka dib-u-**

**eegaha madaxabanaan**) uuna siiyo Maamulaha caddayn gaaban oo sababaha go'aanka dib u eegida madaxabanaan;

(e) ka dib maamuluhu ama:

(i) wax ka bedelo go'aanka asalka ah ee ogeysiinta ugu hooraysa;

(ii) ama hellaa go'aanka dib u eegaha madaxa banaan,

Maamuluhu wuxuu 10 berri oo shaqo gudahood u diri doonaa Xubnaha Kooxda " **Ogeysiiska Dib-u- eegida** kaas oo maamulluhu u sheegayo xubnaha kooxda natiijooyinka dib-u-eegida; iyo

(f) in Maamulaha ay waajib ku tahay cusboonaysiinta Diiwaanka xubnah Kooxda si looga arko natiijada dib ueegida.

### 6.5 Go'aanka dib u eegaha Madaxabanaan ayaa ah kan ugu dambayn sharci ahaan

Go'aanka Dib-u-eegaha Madaxa banaan waa ugu dambayn waana sharci Maamulaha xaggiisa iyo Kooxda Xubnaha oo doonaya dib u eegida.

## 7 Bar ilaa sheegashada

Haddii Xubinta kooxdu aanu siin macluumaadka loo baahan yahay maamulka isaga oo ka jawaabaya qodobka 5(a)(iii) ogeysiinta loo xawilay qodobka 6.2 iyo/ama qodobka 6.4 ka sareeya mudooyinka la qabtay qodobadaas Xubnaha Kooxdana waa loo diiday inay sameeyaan wax dacwa ah oo intaas ka badan wixii khuseeya dacwada.

## 8 Xisaabinta lacagbixinta xubin walba looga baahan yahay

Sida ugu dhaqsaha badan ka dib habka u eegida lifaaqa 6 ayaa la buuxiyey, maamulaha waxaa ku waajiba:

(a) Xisaabin Lacagbixinta Xubin kasta oo ay waajibtay iyada oo laisticmaalayo habka soo socda:

(i) Lacagta la celinayo waxaa laga goyn doonaa xisaabta Dejinta;

(ii) Maamuluhu meelayn doonaa unugyada koox kasta oo ah Xubnaha Kooxda Xaqa u leh kaas oo isu diiwaangeliyey inuu ka qaybqaato qaybinta Lacagta Xalinta sidaan soo socota:

(A) Qof kasta oo qaangaara wuxuu xaq u leeyahay Laba Xubnood - 2 unit

(B) ilma kasta oo u qalma Xubinta Kooxda - 1 unug

(iii) Maamuluhu wuxuu xisaabin doonaa tirada guud oo unugyada Xubnaha Kooxda; iyo

(iv) Maamuluhu wuxuu xisaab doonaa koox walba xaq u leh lacag bixinta isaga oo isticmaalaya foormalada soo socota:

$$\text{Adult Eligible Group Member Payment} = 2x\,\frac{(\text{Settlement Sum} - \text{Reimbursement Amounts})}{\text{Total Number of Units}}$$

$$\text{Child Eligible Group Member Payment} = 1x\,\frac{(\text{Settlement Sum} - \text{Reimbursement Amounts})}{\text{Total Number of Units}}$$

## 9 Ogeysiinta Qiimaynta

Marka maamuluhu xisaabiyo dhamaan Kooxaha xaqa u leh lacag bixinta iyada oo waafaqsan qodobka 8 ee kore, maamuluhu wuxuu degdeg ugu diri doonaa xubin walba ka mid ah kooxda xaqa u leh ogeysiis qiimayneed kaas oo siinaya xubnaha kooxdooda

lacagbixinta ka timid lacagta xalinta.

# 10 Lacagta laga bixiyey xisaabta Dejinta

### 10.1 lacagbixintii mudiciga

20 berri oo shaqo dhexdooda taariikhda amarada la ansixiyey, Maamulaha waxaa ku waajiba inuu bixiyo Cadaka cawilcelinta waxay gaaraysa mudici walba lacagtii Xalinta

### 10.2 Lacagbixinta Xubnaha Kooxda

60 maalmood oo shaqo taariikhda:

(a) Go'aan ka gaarida dib u eegida madaxa banaan ee ugu dambaysa ayaa la bixiyey; ama

(b) Ogeysiintii ugu dambaysa waxaa la bixiyey, haddii aan kooxi

raadsan dib u eegid; maamulayaasha waxaa waajib ku ah inay bixiyaan

lacagaha Xubnaha Kooxda.

# 11 Ogeysiinta lacagbixinta Xalinta

Marka habka dib u eegida la dhameeyo maamuluhuna wuxuu xisaabiyey dhamaan lacagta xubnaha xaqa u leh ee qodobka 8 wixii ka sarreeya, maamuluhu wuxuu degdeg ugu dirayaa qof walba ogeysiinta Xalinta lacagbixinta ay tahay inay ku jiraan, macluumaadka soo socda:

(a) Lacagta Xubnaha Ururka waxay gaaraysaa;

(b) Faahfaahinta xisaabinta Maamulayaasha ee Kooxda Mudan ee Cadadka Xubnaha xalinta; iyo

(c) Faahfaahinta bangiga ee xubnaha kooxda xaqa u leh Xubnaha akoontiga bangiga kaas oo lagu shubay Lacagtii xalinta.

# 12 Ogeysiisyada

(a) Ogeysiin walba ama wada xiriir la bixiyey waxay la socotaa Xalinta Qaybinta Mashruuca, waxaana loo arkayaa siin iyo helida dhamaan ujeedooyinka la xiriira mashruuca Qaybinta lacagbixinta haddii ay:

(i) lagu diray qofka la siiyey;

(ii) midkood

(A) laga soo diray email loona diray cinwaan email sida lagu diiwaangeliyey Xubnaha Kooxda loomana dirin email "aan loo diri karin" jawaab ayaa laga hellay diraha; ama

(B) waxaa lagu diray prepaid mail, qofkaas cinwaankiisa boostada halkaas oo aan email ka shaqayn karin Diiwaanka Xubnaha Kooxda.

(b) Ogeysiin walba ama wada-xiriir kasta oo waafaqsan habkaan waxaa loo qaadanayaa in la siiyey oo la hellay:

(i) haddii loo diray email, waqtiga la diray;

(ii) Haddii lagu diray boostada cinwaan Australia ah, saddex berri oo shaqo ka dib marka la diray; ama

(iii) Haddii lagu diray boosto qofka loo dirayna joogay wadanka dibadiisa,

shan maalmood oo ganacsi ka dib marka diro.

(c) Maamulaha meesha lagala xiriirayo waa sida soo socota ilaa maamulayaashu u sheegaan diraha si kale:

Boostada: 50 Lonsdale St, Melbourne Victoria 3000

Email ahaan: COVID-19-Towers@health.vic.gov.au

# 13 Mudaynta

(a) Maamulaha waxaa ku waajiba inuu u halgamo in uu dhamaystiro maamulka xalintaan qaybinta mashruuca 180 maalmood gudahood oo taariikhda Ansixinta Amarada Taariikhda.

(b) Marka laga saaro wixii la bixiyey, maamuluhu waxaa laga yaabaa inuu go'aansado waqtiga ama mudooyinka waqtiga qaadista talaabooyinka ku haboon oo hoos imanaya Dejinta Qaybinta Mashruuca, iyada oo la qadarinayo Ujeedada Mashruuca.

(c) Iyada oo ku xiran amar kasta oo maxkamadeed, waqtiga la samaynayo falkasta ama wax kasta oo hoos imanaya Xalinta Mashruuca Qaybinta ayaa laga yaabaa in uu ballaariyo Maamuluhu awoodooda gaarka ah.

(d) Waqtiga samaynta ficil kasta ama waxa hoos imanaya xalinta Qaybinta Mashruuca ayaa laga yaabaa in la kordhiyo ama lagu dheereeyo amarka Maxkamada.

# 14 Gunaanadka Maamulka

## 14.1 Qaybinta Warbixinta

(a) 20 berri oo shaqo dhexdooda oo socota taariikhda lacagbixinta Xubnaha Kooxda Ugu dambaysa waa la qaybiyey lacagta Xalinta, Maamulayaasha waxaa waajiba inay bixiyaan warbixin kooban oo maxkamada:

(i) Isku darka guud koox kasta oo ah Xubnaha Xaqa u leh; iyo

(ii) Xubinta Kooxda Xubnaha oo ka hellay Xisaabta isku darka.

(b) Sida ugu macquulsan ka dib bixinta warbixinta lagu sharxay lifaaqa 14.1(a) ee maxkamada, Maamuluhu waa inuu u sheegaa mudiciga iyo isdifaacaha wakiiladiisa sharciga taas oo lacagta la qaybinayey loo qaybiyey sida waafaqsan Mashruuca Qaybinta Xalinta, Ujeedooyinka mashruuca iyo amara kale oo kasta oo ay samaysay Maxkamadu.

## 14.2 Dhamaadka Maamulka

Haddii maxkamadu aanay u amrin si kale, Maamulaha waxaa waajib ku ah in uu joojiyo inuu yahay Maamule iyada oo waafaqsan kuwa soo socda:

(a) Qaybinta dhamaan Xalinta Lacagbixinta ku wajahan Xubnaha Kooxaha Xaqa u leh ayaa la sameeyey;

(b) Dhamaan lacagbixinta sida waafaqsan qodobada 10 0 waa la bixiyey;

(c) Xalinta lacagta ayaa ahayd mid lagu daalay; ama

(d) bixinta macluumaadka warbixin hoos imanaysa qodobka 14.1 ee kore.

# 15 Fasiraad/tarjumid

Xeerarka soo socda ayaa dabakhaya haddii aan macnuhu u baahnayn si kale:

(a) Cinwaanada iyo magac-u-dhigid waa ku habooni ahaan keliya waxna ma yeelayaan tarjumaada.

(b) Keli ahaanta waxaa ku jamac, wada hadalka ayay sidoo kale khusaysaa.

(c) Jinsiga waxaa ku jira jandaro oo dhan.

(d) Haddii eray ama weedh la sharxay, waa qaabab kale oo qaab naxwe waxay macne u dhigma.

(e) Tixraaca qofeed waxaa ku jira shirkad, amaano, wadaag, aan isku dhafnayn ama hab kale, ama ha ka koobnaato hay'ad sharci.

(f) Tixraaca dollar-ka iyo $ waa lacagta Australia.

(g) Tixraaca wax kasta waxaa sameeyey qof kasta oo uu ku tixraacwaxyaallaha uu sameeyey agaasime, sarkaal, adeege, wakiil, wakiil shakhsiyeed waa la ogolaaday inuu sidaas ahaado sharciyan ama mihnad kale oo kasta oo xalinta dhaarta ama Qaybinta Xalintaan.